

ALLINA HEALTH  
OGGOLAANSHAHA BIXINTA MACLUUMAAD

1. **Helaha Diwaanka adeeg Bixiyaha:** Adeeg helaha diiwaanka adeeg-bixiyaha waxa uu daryeelayaasha caafimaadkayga ka gargaaraa sidii ay ku heli lahaayeen meesha aan ka helay gargaar caafimaad iyo macluumaad ku saabsan caafimaadkeyga si ay ii daaweeyaan. Allina Health (“Allina”) waxay heli karaan macluumaadka caafimaadkeyga ee ku jira adeeg helaha diwaanka adeeg-bixiyaha si ay gargaar caafimaad ii siiyaan. Allina diiwaankayga caafimaad waxa ay la wadaagi kartaa keydka diwaanka caafimaadka haddii aanan calaamadayn sanduuqa hoos ku yaal. Haddii aan calaamadeeyo sanduuqa hoos ku yaal, waxa aan fahamsanahay in aanay Allina siineyn macluumaadkayga caafimaad adeeg helaha diiwaanka adeeg-bixiyaha.

2. **Macluumaad la siiyo Lacag-bixiyayaasha:** Waxa aan oggolahay in diiwaanadeyda caafimaadka iyo macluumaadka la xiriira caafimaadkeyga la bixiyo iyada ooy ujeedadeedu tahay lacag-bixin iyo fulinta howlo daryeel caafimaad. Waxa aan oggolahay in diiwaanadeyda iyo macluumaadkeyga caafimaad la siin karo Medicare shirkadeyda caymiska (insurance) ama hay’ad joogteyn caafimaad, lacag bixiyayaal kale, adeeg bixiyayaal kale oo adeegayga ka qeybqaatay, ururada shabakadaha lacag-bixiyayaasha oo ay ku jiraan hayado daryeel oo lala xisaabtami karo taas oo adeeg bixiyaheygu ka tirsan yahay, iyo qandaraaslayaal iyo maamulayaasha qeyb sadaxaad oo ka socda mid kasta oo kooxdaas ah.

3. **Macluumaad loo bixiyo Lacag-bixin iyo Howlo Daryeel Caafimaad:** Waxa aan Medicare, shikadeyda caymiska ama hay’addeyda joogteynta caafimaadka, lacag bixiyayaal kale, ururada shabakado lacag-bixiyayaal oo ay ku jiraan ururada daryeel ee lala xisaabtami karo iyo qandaraas-qaatayaashooda iyo maamulayaasha qolo sadaxaad u oggolahay in diiwaankayga iyo macluumaadkeyga caafimaad ee laga helay Allina ama adeeg-bixiye kale la wadaagaan Allina, adeeg-bixiyayaasha kale ee aan ka helay adeegyo, iyo lacag biyeyaal kale, ururada shabakadaha lacag-bixiyayaasha, oo ay ku jiraan hay’ado daryeel oo lala xisaabtami karo taas oo adeeg bixiyaheygu ka tirsan yahay, iyo qandaraaslayaal iyo maamulayaasha qeyb sadaxaad oo ka socda mid kasta oo kooxdaas ah hadba sida looga baahdo lacag-bixin iyo xaga howlaha daryeel caafimaad.

4. **Macluumaad la Siiyo daryeelayaasha Caafimaad:** Waxa aan oggolahay in diiwaanadeyda caafimaad ee ay abuurtay, heshay ama hayso Allina dawentayda daraadeed la siiyo adeeg bixiyayaasha daryeel caafimaad ee ku lug leh dawentayda. Ogolaanshahan kuma jiro bixinta macluumaad laga helay ama laga abuuray qeyb daweysa si xun u isticmaalka daroogo iyo qamri.

5. **Ogolaashaha in loo Icticmaalo Diiwaanka Caafimaad Cilmi-baaris:** Waxa aan oggolahay in Allina Health isticmaasho ama u ogolaato diiwaankeyga caafimaad cilmi- baaris, taas ooy ku jiraan diiwaankii ay Allina abuurtay iyo kuwii ay ka heshay daryeelayaasha kale ee caafimaad marka ay i daweyneysay haddii aanan sanduuqan calaamadeyn.

Ogolaanshahan abidkeed wuu jirayaa haddii aadan joojin adiga oo warqad noogu soo hagaajinaya: Allina Health Information Management, Mail Route 20300, 2828 10<sup>th</sup> Avenue South, Minneapolis, MN 55407; Laakiin haddii oggolaanshaha la joojiyo, waxba ka baddali mayso bixitaanada harey loo sameeyay.

---

Saxiixa bukaha ama Wakiil sharci

---

Taariikhda/Saacad

---

Xurruuf kala go’an magaca wakiil sharci ah

---

Awooda loogu saxiixayo  
(Soo raaci dekumeenti)